14

Sida loo dalbado magdhow

How to claim compensation
– Somali translation

gateway housing association

Sida loo dalbado magdhow

Waxaanu aad ugu dadaalaa inaanu heerarkayaga ka dhigno qaar sare. Haseyeeshee, waxa jiri kara marar aanay adeegyadayadu la kulmin waxyaabaha aad ka filayso. Markay tani dhacdo, waxaanu isku daynaa inaanu si dhakhso ah dhibaatada u xallino.

Magdhow ayaanu ku siin doonaa haddii aad heshay adeeg aad u hooseeya. Waxaad ka codsan kartaa xaffiiskayaga nuqul buuxa oo ah siyaasadayada magdhowga.

Waraaqdani waxay kuu sheegaysaa:

- Marka aanu magdhowga bixino;
- Inta aanu bixino;
- Sida aanu u bixino;
- Sida loo dalbado magdhow; iyo
- Waxa la sameeyo haddii aanad ku qanacsanayn.

Goorma ayaad magdhowga bixisaa?

Magdhow ayaanu ku siin doonaa haddii mid ka mid ah waxyaabaha soo socdaa ay kugu dhacaan.

Haddii aanad isticmaali Karin qol gurigaaga ka mid ah

Magdhow ayaanu ku siin doonaa haddii aanaan samaynin oo qabanin shaqooyinkii loo baahnaa qolkaaguna aanu ku haboonayn in lagu noolaado. Tani waxa keliya oo ay khusaysaa haddii aanad adigu sababin dhibaatada qolka, isla markaana aad noo ogolaatay inaanu shaqada qabano.

Waxa laga yaabaa inaanu ku siino hoy kumeelgaadh ah. Tan waxa laguugu bedelayaa magdhowga.

Haddii aanu ku siin weyney adeeg aad lacagtiisa adeegga bixiso

Waxaanu ku siin doonaa magdhow haddii aanu ku guuldaraysano inaanu ku siino adeeg in ka badan 14 maalmood. Magdhowgu wuxuu noqon doonaa mid u dhigma intaad adeegga ka bixisay muddada aanu ku guuldaraysanay inaanu ku siino adeegaas, iyo lacag keliya oo dhan £10.

Haddii aad tahay dadka deggan, waxaanu magdhowga ku shubi doonaa akawnkaaga kirada 28 maalmood gudahood markaanu bilowno inaanu mar labaad adeegga ku siino.

Haddii aad tahay dadka guryaha iibsaday ama si wadaag ah u leh, magdhowga waxaanu ka jari doonaa biilkaaga xiga ee lacagta adeegga.

Haddii aanu ku samayn weyno dib u samayntaada muddadii la isku waafaqay

Waxaanu ku siin doonaa magdhow haddii aanu ku guuldaraysano inaanu wixii dib u samayn degdeg ah u baahan ku samayn weyno muddooyinkayagii. (fadlan ka eeg waraaqda dib u samaynta iyo dayactirka muddooyinka). Tani ma khusayso dib u samaynaha joogtada ah.

Haddii aanu ku guuldaraysano inaanu ilaalino ballan

Waxaanu ku siin doonaa magdhow haddii aanu adiga kula qabanqaabino ballan oo aanu maalintaas iman weyno.

Waxa kale oo aanu magdhow ku siin doonaa haddii aanu nimaadno anaga oo habsan ah in ka badan saacad anagoo aan kuu sii sheegin ballantuna aanay hirgelin sababta oo ah anaga oo habsaanay.

Haddii aanu inta shaqada la qabanayo aanu sababno arbushaad iyo dhibaato

Kaysaska badankooda, shaqooyinka waaweyn waanu qorshaynaa waxaanuna kula ogolaanaa'gunnada arbushaada' (waxoogay lacag ah oo aanu ku siino sababtoo ah anagoo arbushnay waxqabadkaagii maalin walba ee qorshaysnaa) adiga kahor intaanay shaqadu bilaabmin.

Waxaanu ku siin doonaa magdhow haddii ay ku saamayso shaqo aan la sii qorshaynin ama degdeg ah oo arbushaad khatar ah keentay.

Haddii aanu waxyeelayno alaabtaada ama sharaxaadaada guriga gudihiisa

Waxaanu ku siin doonaa magdhow haddii aanu waxyeelayno alaabtaada ama sharaxaadaada guriga gudihiisa intaanu ka shaqaynayno. Waxaanu wax kasta ku celin doonaa siday ahaayeen kahor intii aanaan waxyeelin. Waa inaad isku daydaa inaad ka dalbato caymiskaaga alaabta wixii jaba marka hore.

Haddii aanaan raacin nidaamadayada

Waxaanu ku siin doonaa magdhow haddii aanaan nidaamada si sax ah u raacin tani ay keento dhibaato weyn ama macnaheedu noqdo inaan lacag bixiso.

Intaanu bixino

Dhibaatada	Markaanu magdhow bixinayno	Inta magdhowgu yahay
Haddii aanad isticmaali Karin qol gurigaaga ka mid ah.	Haddii anaga ama dawladdaada hoose aanu ogolaano inaan qolka la isticmaali Karin.	Waxaanu magdhowga u xisaabinaa oo aanu qaadanaa tirada inta qol ee aan la isticmaali Karin markaasaanu u qaybinaa tiradan wadarta inta qol ee uu gurigaagu yahay. Kadibna waxaanu ku dhufanaa tan qiimaha kiradaada toddobaadka. Tusaale ahaan, haddii qolka fadhiga ee guri saddex qol oo hurdo leh aan la isticmaali Karin (oo markaas hal qol oo afartii qol ka mid ah aan la isticmaali Karin) kirada guriguna ay tahay £75 toddobaadkiiba, waxaanu magdhowgaaga u xisaabin doonaa sida hoos ku qoran. 1/4 x £75 = £18.75
Haddii aanaan bixinin adeeg in ka badan 14 maalmood.	Haddii ay kooxdayada adeegga dadka degani ay ogolaadaan inaanaan adeegaas bixinin.	£10 iyo kharashka adeegga aad bixisay ee aanad helin.
Haddii tiishka ama sameecadda la iska maqlaa aanay shaqaynayn in ka badan 2 toddobaad.	Haddii kooxdayada adeegga guryuhu ay ogolaadaan inaanaan adeegga bixinin.	£10 iyo kharashka adeegga aad bixisay ee aanad helin.
Haddii hiitkaaga ama biyahaaga kululi aanay shaqaynayn.	Haddii kooxdayada adeegga guryuhu ay ogolaadaan inaanaan adeegga bixinin.	£3 maalintiiba, iyo kulaylinta kale.

.....socota

Dhibaatada	Markaanu magdhow bixinayno	Inta magdhowgu yahay
Wixii khasaare ah ee uu sababo ku guuldaraysigayaga inaanu bixino adeeg ama wax dib u samayn ku samayno. Tusaale ahaan haddii cunto tallaaja-ddaada ku jirta la tuuro koronto la'aan darteed.	Haddii kooxdayada adeegga guryuhu ay ogolaadaan inaanaan adeegga bixinin.	£10
Haddii kijada ama xamaamka aan la isticmaali Karin sababta oo ah anagoo ku guuldaraysanay inaanu dib u samaynta dhamaystirno ama aanu adeeg bixino.	Haddii kooxdayada adeegga guryuhu ay ogolaadaan inaanaan adeegga bixinin.	£10 maalintiiba qofkasta oo deggan oo diiwaangashan ama qofka guriga leh.
Haddii aanu ballan ilaalin weyno.	Haddii uu qandaraaslaha (tusaale ahaan muhandaska gaastu) ogolaado inaanaan adeeg bixinin.	£10
Haddii aanu ku dhamayn weyno dib u samaynaha degdegga ah muddooyinka la daabacay.	Haddii kooxdayada adeegga guryuhu ay ogolaadaan inaanaan adeegga bixinin.	£10 iyo £2 maalin kasta oo aan dib u samaynta la dhamaystirin (illaa iyo heer £50 ah).

Dhibaatada	Markaanu magdhow bixinayno	Inta magdhowgu yahay
Haddii aanu arbushaad weyn sababnay shaqada aanu qabanaynay awgeed	Haddii kooxdayada adeegga guryuhu ay ogolaadaan inaanu arbushaad weyn sababnay iyo dhibaato.	Waxaanu magdhowga u xisaabinaa oo aanu qaadanaa tirada inta qol ee aan la isticmaali Karin markaasaanu u qaybinaa tiradan wadarta inta qol ee uu gurigaagu yahay. Kadibna waxaanu ku dhufanaa tan qiimaha kiradaada toddobaadka. Tusaale ahaan, haddii qolka fadhiga ee guri saddex qol oo hurdo leh aan la isticmaali Karin (oo markaas hal qol oo afartii qol ka mid ah aan la isticmaali Karin) kirada guriguna ay tahay £75 toddobaadkiiba, waxaanu magdhowgaaga u xisaabin doonaa sida hoos ku qoran. 1/4 x £75 = £18.75
Haddii intaanu shaqada wadno aanu alaabtaada jebino.	Haddii kooxdayada adeegga guryuhu ay ogolaadaan inaanaan adeegga bixinin.	Illaa iyo £1000
Haddii aanaan nidaamada raacin	Haddii aanu nidaamada raaci weyno	Illaa iyo £1000

Sidaanu u bixino magdhowga

Waxaanu u bixin doonaa magdhowga siyaabaha soo socda.

- Haddii aad lumiso isticmaalka qol gurigaaga ka mid ah ama aad lumisay adeeg aanu bixino, magdhow ayaanu kuugu shubi doonaa akawnkaaga kirada iyo akawnkaaga lacagta adeegga.
- Haddii isugeynta lacagta aad dalbatay ay ka yartahay £25,

laba maalmood oo kuwa shaqada gudahood ayaanu kuugu soo diri doonaa boonooyin aad dukaamada waaweyn ee suuqa aad ku isticmaashid.

- Haddii isugeynta lacagta aad dalbatay ay ka badantahay £25, muddo 28 maalmood gudahood ah ayaanu kuugu soo diri doonaa jeeg. Haddii aanu lacag kugu leenahay ah kiro ama lacagta adeegga, magdhowga ayaanu ka jari doonaa lacagta aanu kugu leenahay.

Dalbashada

Waxaad foomka dalbashada ka heli kartaa:

- haddii aad waraaq noogu soo qorto xaffiiskayaga 409–13 Mile End Road, London, E3 4PG;
- haddii aad nagala soo hadasho telifoonka 020 8709 4300;
- haddii aad xaffiiskayaga timaad oo aad mid ka qaadato; iyo
- adigoo kasoo guuriya websaytka ah www.gatewayhousing.org.uk.

Markaad foomka hesho buuxi oo nagu soo celi. Xusuusnow inaad noo soo dirto wixii sawiro ah iyo waraaqo ee taageeraya, nuqul foomka ahna adigu hayso.

Waraaq ayaanu kuu soo qori doonaa aanu kuugu sheegi doono inaanu foomkaagii dalbashada helnay muddo shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood markaanu helno. Waraaqdan waxa ku qornaan doona lambarka tixraaca si aad adigu u isticmaasho haddii aad doonayso inaad na weydiiso sida dalabkaagii u socdo.

Waxa la sameeyo haddii aanad ku qanacsanayn go'aankayaga

Haddii aanad ku qanacsanayn jawaabtayada dalabkaagii, waxaad naga codsan kartaa inaanu dib uga fiirsano go'aankayaga mar labaad. mid ka mid ah maamuleyaa-shayada ayaa dalabkaaga dib uga fiirsan doona.

Haddii aanad weli ku qanacsanayn, waxaad dalabkaaga u gudbin kartaa guddida racfaanada. Guddidan waxa ka mid noqon doona fuliyaha guud ama maareeye (oo aan go'aankii hor ku lug lahayn) iyo laba xubnood oo ka mid ah golaha dadka deggan. Guddida racfaanadu way bedeli karaa qiimaha magdhowga la bixiyey ama la ogolaaday, wayna bedeli karaan go'aanadii hore.

Haddii aanad ku qanacsanayn go'aanka guddida racfaanada, waxaad la xidhiidhi kartaa Garyaqaanka Guryaha ee Madaxabannaan adigoo kala hadlaya telifoonka ah 020 7421 3800 ama 0845 7125 973

Waxaad nuqulka siyaasadayada magdhowga oo buuxda aad ka heli kartaa anaga haddii aad nagala soo hadasho 020 8709 4300.

You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng khổ chữ lớn, băng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。 [Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]

Awarded for excellence

INVESTOR IN PEOPLE

North River Alliance

Gateway Housing Association
409-413 Mile End Road, London, E3 4PB
Residents: 020 8709 4300
General enquiries: 020 8909 4409
Fax: 020 8709 4400
Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk
www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. **Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.**